



**Ogow XAQIIQOYYINKA ku saabsan GARGAARADA DOWLADDEED  
Cusboonaysiintii u dambaysay Janaayo 31, 2020**

**Xeerka gargaarada dowladdeed ‘public charge’ ee cusub ma aha mid hadda ka dib la joojiyay/xannibay. Wuxuu dhaqan geli doonaa Febraayo 24-keeda, 2020. Xeerka cusub ma noqon doono mid muddo hore la oggolaaday.**

- Janaayo 27, 2020, Maxkamadda Sare ee Maraykanka ayaa dhinac iskaga dhigtay ammar hordhac ahaa oo ka socday New York kaasi oo Wasaarada Amniga Gudaha ee Maraykanku ka horjoogsaday in uu xeerka gargaarada dowladdeed ‘public charge’ ka dhaqan galo dalka oo dhan.
- Sababta oo ah xeerka cusub oo aan noqon doonin mid muddo hore la oggolaaday, cidna loo qabsan maayo ilaa Febraayo 24-keeda, 2020.
- Gobolka Oregon ayaa si dhow ula socda halka ay wax marayaan ee dhanka gargaarada dowladdeed ‘public charge’.
  - Waxaanu sii wadi doonaa in aad macluumaadka cusub la socodsiiino macaamiisheena, hawl-wadaagayaasha bulshada, xubnaha dadweynaha iyo wax-daneeyayaasha kale marka macluumaad dheeraad ah la heli karo.

**Xeerka gargaarada dowladdeed ‘public charge’ ee cusub. Ma aha mid khuseeya muhajir kasta.**

- Kuwo badan ayaa laga dhaafay, sida qoxootiga iyo magan gelyo doonka.

**Kuwo badan oo ah gargaarada dadweynaha loomu xisaabiyo in ay yihiin gargaarada dowladdeed ‘public charge’.**

- Guudmarka barnaamijyada gargaarada dadweynaha ee ka jira Oregon ee loo xisaabinayo (aan loo) xisaabinayn gargaaro dowladdeed “public charge” ahaan, fiiri [SU’AALAHA INTA BADAN LA ISWEYDIYO ee gobolka Oregon](#).
- Xeerarka u qalmida ee loogu talagalay barnaamijyada gargaarada dadweynaha ee ka jira Oregon lama beddelin.

**Gargaarada dadweynaha ee carruurtaada iyo xubnaha kale ee qoyska ay helaan loomu xisaabinayo adiga marka ay noqoto daraasadda lagu sameynayo gargaarada dowladdeed ‘public charge’.**

**Helitaanka gargaaradada dadweynaha oo kali ah kaama dhigayo qof helaya gargaarada dowladdeed ‘public charge’.**

- Daraasadda lagu sameynayo gargaarada dowladdeed ‘public charge test’ waxay ahayd in la eego dhammaan xaaladaha qofka kaliya ma aha in ay jecel yihiin in ay isticmaalaan gargaarada dadweynaha—iyada oo arimo dhowr ah oo

wanaagsan oo loo eegayo kuwo xun ee jira, sidaa isticmaalka gargaarada dadweynaha.

**La soco Waxa jira. Waxbaa isbeddeli kara.**

- Ha gaarin go'aano adiga oo ku saleynaya cabsi, ka dhig kuwo ku saleysan xaqiiqoojin.
  - Gargaarada dowladdeed waa mid adag.
  - Kiis kastaa wuu kala duwan tahay.
  - Kaliya muhaajiriinta qaarkood ayuu si toos ah u saameynayaa.
  - In kasta oo xeerku hadda dhaqan geli karo, haddana dadaalo dhanka dacwada ah ayaa socda.

**Kali kuma tihid. Waxaa jirta caawimaad.**

- La hadal khabiir dhanka sharciga ah ka hor inta aadan gaarin go'aano oo aysan kugu dhicin caafimaad, nafaqo, guri la'aan iyo taageerada dadweyne ee kale ee aad u qalanto isla markaana adiga iyo qoyskaadu u baahin tihiin si aad horumar u gaartaan.
  - Wac **Khadka Gargaarka Dadweynaha ee Oregon 1-800-520-5292**, ama
  - Booqo internet-ka si aad u hesho qareenka dhanka socdaalka [oregonimmigrationresource.org](http://oregonimmigrationresource.org).